# CUT. 5aad: Wacyigelin, Waxbarid & Talo bixin:

## I. Wacyigelinta:

Wacyigelinta waxaan ula jeednaa faahfaahinta iyo fatwa ka bixinta arrimaha khuseeya badaha dalka, arrintaan oon isu xilsaarnay markii aan aragnay in aan nahay hey'add loo habeeyey cilmibaarista badda lehna kaadar aqoonyahan ah lehna takhasusyo kala duwan ee xaga cilmiga badda, deegaankeeda, qaanuunkeeda, nabadgelyadeeda, kheyraadkeeda, xuduudaheeda … iwm.

Qaabka wacyigelintaan aan ku bixino waa qaab cashar u jeedin furan oo laga sii daayo warbaahiinta dalka iyo dibadaba.

Waxaan hortagnay barlamaanka warbixinno ka jeedinay laba jeer.

Waxaan ka hadalnay TVga Qaranka iyo Radio Muqdisho 10 jeer, raadiyaasha FM yada Muqdisho tiro aan xadidneen.

Waxaan su'aalo badan uga jawaabnay Raadiyaasha FM ka ah ee Muqdisho.

Waxaan wax badan ka jawaabnay barnaamijka wicitaanka dhagaystaha ee raadiyaasha dibadda gaar ahaan BBC, VOA, Aljazeera iyo universal iyo kuwa kale.

Casharadeenu ama fatwadeenuba waxay ku jeedeen soo bandhigidda Qaanuuneed ee lahaanshaheenna badeed, qarannimadeena badeed, hodannimada badaheenna iyo xuduudaha badaheenna, arrintaanoo aan ugu tala galnay in nacabkuna ka naxo naxaankuna ku farxo.

Waxaa ugu weyn wax yaalaha aan ku bixino wacyigelinta badaheenna iyo waxay xambaarsan yihiin waxaa ugu horeeya **Majallada Juula - Jawaay** aan horay usoo sheegnay.



Admiral Faarax oo Raadiyaha Qaranka ka jeedinaaya wacyigelinta arimaha badda



Admiral Faarax oo TV Qaranka ka jeedinaaya wacyigelinta arimaha badda



Md Cabdinuur oo ka hadlaya arrimaha badda

# II. Akadeemiyadda Khaliif Mocow Xasan


**Waxbaridda iyo Tababaridda Bahda Badda:**

Waxaa noo soo baxday markii aan ku jirnay Cilmibaaristaan in aqoonteenna badeed hey'ad ahaan aysan aad u sareyn, dadweynaha Soomaaliyeedna guud ahaan uu ku liito aqoonta badda, hadaba waxaa muuqatay baaxadda badda aan leenahay iyo baahsanaanta kheyraadka ku jira (Noole iyo Ma Noole) iyo faqriga xad dhaafka ah ee xeebaaleydeena gaar ahaan iyo shacabka Soomaaliyeed guud ahaan iyo aqoontooda badeed oo aad u hooseysa, inay lagama maarmaan tahay in xoog la saaro baahinta iyo sare u qaadidda aqoonta badda iyo tababarrada xirfadeedyada. Sidaas awgeed waxaa hey'addu abuurtay:

**AKADEEMIYAD** loogu magac daray **AKADEEMIYADA CULUUNTA BADDA & QAWAANIINTA BADDA EE KHALIIF MACOW XASAN** oo ah heer Jaamacadeed, waxaanna ku billownay laba kulliyadood oo kala ah:

- **Kulliyada Culuunta Badda**
- **Kulliyadda Qawaaniinta Badda**

Waxaanna rajeyneynaa in mustaqbalka Akadeemiyaddu ay yeelato kulliyado kale.



Akadeemiyadu waxay fulineysaa ka sokow duruusteeda Jaamacadeed koorsooyin gaagaaban iyo tababarro kala duduwan, waxaan fileynaa afar sano ka dib in dalku ay usoo saari doonto Jaamiciyiin takhasus ku leh Culuunta badda iyo Qawaaniinteeda iyo Kaadar dhexe oo farsama yaqaan ah oo dugsi ka tirsan Akadeemiyada uu diyaarinaayo. Waa kee Khaliif Mocow iyo sababta loogu doortay in lagu magacaabo AK/DA.

## TAARIIKH NOLOLEEDKII G/S. BADMAAX KHALIIF MACOW XASAN

Khaliif Macow Xasan wuxuu ku dhashay Muqdisho, Deg Shangaani, 1925kii. Wuxuu ka baxay Dugsigii Badda kana noqday Macallim, 50 maadkii Qarnigii tagay. Wuxuu waxbarasho u aaday dalka Talyaaniga 1959kii,wuxuuna qaatay shahaadada BA ee Culuumta Badda, wuxuuna noqday X/LE, wuxuuna ku soo labtay dalka 1961dii, wuxuu madax u noqday kooxdii C.BADDA [Plotone Marinaio Somalo] oo xilkoodu ahaa ilaalinta Dekedaha Dalka. Dec 1964tii kooxdii Baddu waxay ku biirtay XDS. DH Khaliif iyo kooxdiisi waxay kula wareegen Dekedda Berbera labadii Markab ee ugu soo horeysay Ciidanka Badda 10/2/1965kii.

DH Khaliif Macow wuxuu waxbarasho u tagay 1965tii Akadeemiyada C.Badda ee Leningrad [EX URSS] wuxuuna ka qaatay shahaadada MA ee Culuumta Ciidamada Badda 1969 wuxuu ku soo noqday dalka, isla waqtigaas waxaana loo magacaabay Abbaanduulaha C.Badda, jagadaas uu hayay ilaa 1976kii asagoo gaaray Darajada G/sare, dabadeedna wuxuu ka fadhiistay shaqada Ciidanka, wuxuuna Geeriyooday 1988dii.

G/sare Khaliif Macow wuxuu ahaa nin dabecad qaboow, wuxuuna dowr weyn ka soo qaatay arrimaha Badda Rayid iyo Ciidanba, xag tacliin iyo xag maamulba.

KHALIIF MOCOW WUXUU DOWR WEYN KA SOO QAATAY HOWLAHA ILAALINTA DEKEDAHA, WAXBARIDDA BADLEYDA IYO DIFAACA DALKA, WAA SADDEX HOWL OO AAD U MUHIIM AH OO CID KULANSATA AY YAR TAHAY, SIDAAS AWGEED AYAA LAGU SHARFAY IN MAGACIISA LOO BIXIYO AKADEEMIYA CUSUB.

ALLAHA U NAXARIISTO KHALIIF MACOW XASAN,

Sidaas ayay ku abuurantay **Akadeemiyadda Khaliif Macow Xasan**, waxayna billowday waxbarid xoojin D/S ah oo socotay 5bilood, waxaana INSHALLAAH si RASMI ah loo furi doonaa **1da Maarso 2016ka**. Waxayna ku dhaqaaqi doontaa, laga billaabo Sabti 5/3/2016, waxbariddii loogu tala galay.

# XARUUNTA AKADEEMIYADDA




Xaruunta **Akadeemiyadda** oo ku jeeda xeebta Liida




**Qoraalka Akadeemiyadda oo la muujiyey**

# XAFLADDA FURITAANKA AKADEEMIYADDA KH. MACOW 1/3/2016



Qaar ka mid ah wasiirada xukuumada oo ka soo qeyb galay xafladda furitaanka Akadeemiyadda.



Waxa ka mid ahaa dadkii ka soo qeyb galay xafladda aqoonyahanka Soomaaliyeed iyo Saraakiisha Ciidanka Badda.



Madaxa Akadeemiyadda Cabdinuur Cabdiqaadir Max'ed oo ka hadlaya muhiimada ay u leedahay Akadeemiyada Bulshada Soomaaliyeed



Guddoomiyaha HCSB ADM. GAAS. PROF. FAARAX AXMED CUMAR OO KA HADLAYA FURITAANKA AKADEEMIYADDA.



Wasiirka Kalluumeysiga Mudane Max'ed Cumar Ceymooy XARIGA KA JARAY AKADEEMIYADDA.



Qaar ka mid ah dadweynihii iyo bahda waxbarashada oo ka soo qeyb galay xafladda.

## III. <u>MAJALLADA: JUULA - JAWAAY</u>


**Runtii Majallada Juula – Jawaay** waxaa la gelshaa juhdi weyn oo cilmiyeed oo loo wada dhan yahay, sida badanna daboola mawaadiicda hey'addu u xilsaaran tahay, taasoo aan qabno inay ugu qiima badan tahay waxa aan qabanno, waayo waxay xambaarsan tahay cilmibaaris, aqoon iyo wacyigelin intaba, maxaa yeelay waxaan dareemeynaa in aqoonyahankeena uusan aad ula socon, aadna uga warqabin ahmiyadda baddu ay u leedahay dalka xag dhaqaale, xag deegaan, xag difaac iyo nabadgelyo… iwm.

Sidoo kale shacbiweynaha Soomaaliyeed oo u baahan wacyigelin iyo baraarujin ku saabsan sidii badda looga manaafacaadsan lahaa loona ilaashan lahaa, arrintaanna waa arinta ay u taagan tahay **Majallada Juula – Jawaay.**


Majalladu waa seddex biloodle oo afar cadad ay ka soo baxday sanadkii 2015, waxaanna u qeybinaa xafiisyada muhiimka ah ee dalka. Hadana waxaan ka sameynay afartii cadad kitaab oo runtii noqon kara marjac muhiim ah.

Magaca Majallada waxaa labada Jaziiro ee ugu muhiimsan dad ahaan iyo dhaqaale ahaanba, waa labada Jaziiro ee u dhexeysa 6(lixda) Jasiiro ee la deggan yahay (oo laba way ka waqooyeysaa, waa KOYAAMA Iyo INGUUMI, labana way ka koonfureysaa, waa DARKASI iyo JANDARA, dhammaantoodana lixdaan Jasiiro oo la deggan yahay iyo afar kale oon la degganeyn waxaa la isku yiraahdaa: **Jaziiradaha Jubba**, waxay u dhexeeyaan tobankaan Jasiiradood: Kismaayo iyo Raas Kiyaanbooni), UjeeddadU waxay tahay in Maskaxda lagu hayo AHMIYADDA ISTIRAATIIJIYAD ee Jasiiradahaan.

Faahfaahin dheeraad ah ka aqri: Kitaabka ADM Faarax ee **Tobogaraafiyada Xeebaha Dalka, Muqdisho: 2015ka.**



Afartii cadad ee Majallada Juula Jawaay ee 2015




Afartii cadad oo HAL Kitaab la isugu geeyey

# ABAALMARINTII MUALLIFIINTA & CILMIBAARAYAASHA

Waxaa lagu abaalmariyey Mualifiinta Shahaado- sharafyo lagu bixiyey Xaflad weyn oo loo qabtay Munaasabadda



Guddoomiyaha HCBS oo muujinaaya Shahaada sharafta la guduunsiiyey qaar ka mid ah Cilmibaarayaasha Hey'adda



Ag. Waaxda Culuunta Badda Ing. Cabaas oo shahaada sharaf la gudoonsiinaayo.



Ag. Waaxda Qaanuunka Cabdinuur Cabduqaadir Maxamed oo shahaada sharaf ka gudoomaya wasiir ku xigeenka wasaarada haweenka iyo xuquuqda aadanaha Mrw. Xil. Muumino Sh. Cumar iyo Guddoomiye ADM. Faarax.



Xasan Dooyow  oo ka tirsan waaxda culuunta b adda oo shahaada sharaf la gudoonsiinaayo akhlaaq wanag awgeed.



Qaar ka mid ah aqoonyahanki ka soo qeybgalay xafladda



Xildhibaano iyo Wasiiro ka soo qeybgalay xaflada

## IV. **TALO BIXINTA:**

Howlaha ay Hey'addu u xilsaaran tahay waxaa ugu horreeya TALA BIXIN Cilmiyeysan, waxyaabaha badan oon soo xusnay sida cashar bixinta, maqaal qorridda, diyaarinta warbixinnada cilmibaarista, wax-baridda, dhammaan waxay u adeegayaan QODOBKA TALO-BIXINTA:

Qeyb ka mid ah tallooyinkii Hey'addu ay bixisay, waxaa laga heli karaa warbixinta waxqabadka Hey'adda oo ku xusan GUNAANADKA kitaabkaan; hase yeeshee waxaan jecleysannay inaan halkaan ku soo qaadanno mid ka mid Talooyinkii (markhaatigii taariikhiga) ee safarkeennii BELED XAAWO 16-18/11/2015ka.

Wafdiga DFS wuxuu ka koobnaa Xukuumadda, Barlamaanka, waxaana hoggaaminayey Wasiirka Gaashaandhigga S/GAAS C.C. DIINI, guddiga Xuduudaha iyo Khubaro oon ka mid ahaa aniga oo ah ADM Faarax Qare, waxaana halkaas uga soo biiray wafdiga DFS, wafdi ka socda Maamulka Jubbooyinka ow hoggaaminayey Wasiir ku – Xigeenka Amniga ee Jubbaland.

Sababta loo wada tegay Beled Xaawo waxay ahayd:

1. Ayadoo la shaaciyey in Dowladda Kenya ay Darbi ka dhiseyso Xuduudda labada Dal (Somali & Kenya) kana billowday Beled - Xaawo una sii wado ilaa Xeebta Badweynta Hindiya.
2. Ayadoo la isla dhexmaraayey in Kenya ay soo gashay dhinaca Soomaaliya, waddana ka sameysay gudaha magaalada oo u muuqata xuduud-cusub.
3. In Kenya ay siibtay (BAABI'ISAY) laba Rukun (Kuud) oo ka mid ah 29ka Rukun ee Xudduudda ku calaameeyeen Talyaani iyo Ingiriis oo kala gumeysan jiray labada shacab 1931dii, ka dib markii ay hore ugu saxiixeen xudduudaan London 25/04/1924tii.

Markii la wada tegay Beled Xaawo 17/11/2015 guddiyada (kan DFS & kan Maamulka Jubba) waxaa u caddaatay in:

1. Darbi la dhisay uusan jirin, laakiin waxaan aragnay GOD jiifa oo ka Koonfureeya (xagga Kenya) Xudduudda 6-7 Mitir, oo la leeyahay waa asaaskii darbiga.
2. Wax soo gelitaan ah oo Kenya u soo gudubtay xagga Soomaaliya ayana lama arag.
3. Dadka deggan Beled Xaawo, waliba qaar ka mid ah Mas'uuliintu waxay sheegeen, kuna adeysteen in Kenya siibtay (Tirtirtay) laba RUKUN oy ku tilmaameen meel magaalada Bari ka jirta una jirta ilaa 5-7km, meelihiina way na soo tuseen, laakiin ADM Faarax ayaa diiday kuna adkeystay in wax Rukun ah oo la siibay aysan jirin. Waxaan u sheegay guddiyadii si cadna aan ugu sharaxay 18/11/2015, waa maalintii aan ka soo noqonnay B/Xaawo, shirna aan ku qabannay geedaha waa weyn hoostooda ee ku yaalla daanta Bari ee kaabadda (Brige) Doolow. Waxaan ku iri guddiyada "waxaan gacanta ku hayaa DOKUMENTIGII Talyaaniga iyo Ingiriisku ay ku muujiyeen xudduuddaan oo Rukumanka ay ugu muhiimsan yihiin, waxaa ku yaal dokumentiga tirada Rukumada (29), Koordinaadkooda, masaafada u dhexeysa iyo xaglaha xariiqmaha mideeya laba Rukun oo kasta.

Rukunk L-1, wuxuu ku yaal Xeebta Webiga (dhinaceenna), Rukun L-2, magaalada dhexdeeda, waxayna isu jiraan 450km; (Rukunka L-3, wuxuu ka bareeyaa Rukun L-2) 21.5km; sidaas awgeed Rukuma la siibay oo u dhexeeyo R.L-2 iyo R.L3, ma jiraan, caddeyntaan aad iyo aad ayaa guddiyada ugu riyaaqeen, gaar ahaan guddigii Maamulka Jubbooyinka, oo mahad gaar ah ii soo jeediyey iguna casuumay inaan soo booqdo Kismaayo.



Guddiyadii oo ku shiraya geedaha Mukaga Wabiga hoostooda 18/11/2015- Dooloow



ADM. Faarax, G/S Cabdi Xasan (X.D.S) iyo Taliyaha Saldhigga Booliska ee Doolow
oo taagan Erridda Bari ee kaabadda Wabiga Jubba, Doolow 18/11/2015

Isla markii guddiyadu waxay soo wada saareen BAYAAN lagu coddeeyo in kormeerkii loo yimid B/Xaawo inan lagu helin wixii laga cabannaayey. (waa qodobbada saddexda ahaa oon hore u soo tilmaamay).

Markii guddigii DFS uu ku soo laabtay Xamar, Barlamaanka ayaa ka dhegeystay guddiga wixii ay soo arkeen, anigu si gaar ah ayaa la iiga su'aalay arrintaan, jawaabtuna waxay ahayd waxaa aan kor ku soo xusay.

Waxaa mudan inaan xusno in guux ka jiray Barlamaanka dhexdiisa oo ku tilmaamaya xudduudda Soomaaliya iyo Kenya inay tahay XUDUUD-BEENAAD, arrintaan anigu waan saxay, waxaan iri "xudduudaan ma aha mid BEENAAD ah, taariikh ahaanna weligeed laguma sheegin, waayo laba dowladood oo wada gumeystay labada Dal ayaa kala saxiixatay; Qaanuunka Dowliguna wuu ayidsan yahay".

Dabadeed waxaa hadalkii qaatay Xil Cabdilaahi Sh. Ismaaciil (Safiir iyo Wasiir dibadeed oo hore) wuxuu yiri:

1. "Madaxweynayaasha labada Dal, Max'ed Siyaad iyo Arab Moi ayaa kala qortay ictiraafka xuduuudda iyo iskaashiga labada dal 80maadkii.
2. Anigoo ah wasiirka Arimaha Dibadda Iyo wasiirka arimaha dibadda ee Kenya dib ayaan u sii xoojinnay heshiiskii labada ODAY".

Kormeerkeennii guul ayuu ku soo dhamaaday, dowladeennan Runta jirta ayaan soo gaarsiinay, shacabka Soomaaliyeedna welwelkii wuu deeyey.

Waxaan la yaabay in guryo badan oy ku yaalliin oo Soomaali ka tirsan J.F.S deggan tahay gudaha u galay koonfurta xudduudda ilaa 500-600m. Markii aan weydiiyey guddoomiyaha degmada sababta reer B/Xaawo ay u gudbeen xudduudda, weliba adinka ku andacoonaya in Kenya idin soo dhex gashay oy

xudduudda soo gudubtay; wuxuu iigu jawaabay “dadka galay xudduudda ma aha reer B/Xaawo ee waa kuwii Xamar ka soo qaxay 1991kii, weliba wuxuu iigu daray: waxay qabaan inay deggan yihiin Dhul Soomaali leedahay, halkaas waxaa iiga soo baxday in: Shacabka Soomaaliya ay ku weyn tahay caadifada, wadanninimada, waana tan ay meesha nagu geeyeen, laakiin war iyo wacaal uma hayaan DHAQANKA DOWLIGA.

Waxaan aad ugu faraxsanahay in guusha Barkeed ay ka timid Dokmentigii aan gacanta ku hayey mana jirin cid kale oo wax DALIIL ah heysta, taasina waxay sharaf gaar ah u ahayd **Hey’adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed**

# Gunaanad:

Waxaan u doorannay gunaanadka inaan ku soo uruurinno warbixinta an koobeysa xogtii faahfaasaneyd ee aan ku soo qaadannay Kitaabkan.

**WARBIXINTA WAXQABADKA HEY'ADDA CILMIBAARISTA BADAHA SOOMAALIYEED EE 2015KA**

Waxqabadku wuxuu ku saleysan yahay waajibka Hey'addu qabto. Haddaba aan isla aragno waajibaadka Hey'addaan:

1. XEER - MADAXWEYNE L.29 ee 19/11/2013 oo ku saabsanaa magacaabidda Guddoomiyaha Hey'adda ADM GAAS. Faarax Axmed Cumar, Qod. 1aad wuxuu oranaayaa sidaan: In Guddoomiyaha Hey'addu uu door weyn ka qaato dardargelinta dhismaha Hey'adda.
2. XEER – MADAXWEYNE L.44 ee 21/08/2014 oo lagu sharciyey Hey'adda, Qod 2aad wuxuu leeyahay sidaas:-
   Hey'addu waxay u xilsaaran tahay in ay si Cilmiyeysan u baarto arrimaha la xiriira Badaha Soomaaliyeed si loo helo TALO ay dowladdu ku qaadan karto go'aannada khuseeya BADAHA iyada oo howlgelineysa kana faa'ideysaneysa aqoonyahanka Soomaaliyeed iyo kuwa kaleba.

Qodobadaan xilalka laga dheehan karo haddii lala aqriyo xeer-nidaamiyaha waa 3 (saddex)

- Talo bixin Cilmiyeysan
- Waxbarid & Tababarid
- Kor u qaadidda wacyiga dadweynaha ee arrimaha badda.

Haddaba xilalka waaweyn ee Hey'addu waa 4(afarta) waajib ee ku soo aroortay xeerarka la soo xusay. Haddaba si loo fuliyo waajibaatkaan waxaan degsannay QORSHO HOWLEEDKII SANADKA 2015; waxaa nasiib wanaag ah in waajibaadkii inoogu fulay 150%; hase yeeshee waxaa dhib nagu noqday wada fulinta (ama wada helidda) Qodob hoosaadkii ahaa helitaanka qalabka Cilmibaarista oon rajeyneyno in sanadkaan aan ku guuleysano.

## I. <u>Dhisidda Hey'adda</u>

Dhismaha Hey'adda, wuxuu koobaa:

1. KAADAR Aqoon leh
2. Xafiis Qalabeysan
3. Qalab Cilmibaaris iyo Daabacaad.

Aan mid mid u galno:-

1. Abuurista Kaadarka (Aqoonyahanka), maanta HCBS waxay leedahay:

| No. | Xilalka | Tirade Jaamici/D.Sare |
|---|---|---|
| **1.** | Agaasinka sare | 3 Jaamici |
| 2. | Waaxda Qaanuunka Badda | 3 Jaamici |
| 3. | Waaxda Culuumta Badda | 3 Jaamici+2 D.Sare |
| 4. | Waaxda Deegaanka Badda | 3 Jaamici+ 1D.sare |
| 5. | Waaxda Qorsheynta, IT, Tababarrada & Qoraallada | 2 Jaamici +2 Ds. |
| 6. | Waaxda Dhaqaalaha Badda | 2 Jaamici+ 1D.sare |
| 7. | Waaxda Maamulka iyo Shaqaalaha | 2 Jaamici+ 2 D/sare |
| 8. | Waaxda Xiriirka Dibadda | 2 Jaamici |
| 9. | La – Taliyeyaal | 4 Jaamici |
| 10. | WADARTA: J/DS | 25/8 |

**<u>Wadarta Kaadarka HCBS:</u>**

| | |
|---|---|
| Jaamici: | BA (BS) = 58%, MA (MS)= 25%, PHD =17% |
| D/S | 8 |
| Farsamo- yaqaan | 3 |
| Adeege (D.Hoose) | 4 |

**<u>Wadarta: 36 Shaqaale</u>**

<u>Kaaderkaan wuxu daboolayaas: **85%**</u>

WAXAAN U ARKEYNAA MUCJISO IN MUDDO HAL SANAD AH AY HEY'ADDU KU XAQIIJISAY ABUURISTA KAADARKAAN. <u>ALLA AYAA LOOGU MAHAD CELIYO.</u>

2. <u>XAFIIS:</u> Waxaan ijaaranay guri, si uu u noqdo xafiiska Hey'adda, waxaanna ku jirnay <u>BILO</u>, dabadeed waxaan barinnay Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta oo si KMG ah inoo siisay saddex Qol oon howsha ku wadano, inkasta oon dadaal

badan u galnay weli xafiis dowlo ma helin, laakiin: HOWSHEENNU MARNA MA FADHIISAN DOONTO.

3. Qalabka Cilmibaarista, Qoraallaada iyo daabacaadda: si iskaa wax u qabso ah ayaan ku helnay COMPUTERRO, BARNAAMIJYO, KUTUBO maraajic ah (Maktabad Takhasusi ah) iyo qalabka daabacaadda. Laakiin aad iyo aad ayaan xaggaan uga liidannaa.

SIDAAS AWGEED AYAAN KU FULINAY MUDDO HAL SANO AH WAAJIBKII KOOWAAAD EE DHISIDDA HEY'ADDA OON QABNO INAAN KU GUULEYSANNAY 150% AYADOON WAX KAALMO AH AAN LAGA HELIN DOWLADDA LAAMAHEEDA KALA DUDUWAN.

## II. Waajibka 2aad wuxuu ahaa inaan Dowladda siinno TALO cilmiyeysan

Arrintaan waxay inooga baahan tahay inaan annagu aqoonyahan ahaan isdiyaarrinno oon kor u qaadno aqoonteenna si aan u bixin karno talo cimiyeysan :-

**Waxaan qabannay:**

1. Waxaan daraasad ku sameynay qawaaniintii Badda ee dalku soo saarey
   a. Qaanuun L.1 ee 21/1/1959 waan daabacney
   b. Qaanuun L.7 ee 11/11/1966 waan daabacney
   c. Qaanuun L.37 ee 10/9/1972 waan daabacney
   d. Qaanuun L.5 ee 26/1/*1989 (computer ayaan ku qorney, wax baddanna waxaan haleeshiiney UNCLOS, waana qaanuunka badda ee* ***rasmiga;*** *sidaas awgeed waxaan ku faafiney Xafiisyada dowladda. Hawshaan Gaaladu waxay ku qaban laheyd sanooyin iyo miisaaniyad weyn, annaguna waxaan ku fuliney iska wax u qabso, welina ma aanan helin xattaa kalimadda mahadsanidiin).*
2. Waxaan qorney kutubo asaas ah oo ku saabsan Culuumta Badda iyo Danaha Dalka oo gaaraya 5 kitaab
3. Waxaan ku sameynay baaris sicirka iyo noocyada: Kalluunka ee lagu iibiyo suuqayada Muqdisho, natiijadiisiina Buug ayaan ku soo saarney

Waxaan isku xukunnay haddii aan nahay, HCBS in aan sare u marinno aqoonteenna, waxna isbarno, sidaas awgeed waxaan qorsheynay fulinnana:

a) Casharro 2jeer todobaadkii
b) Aqoonisweydaarsi (gudaha) 1jeer Bishii
c) Aqoonisweydaarsi furan 4jeer sanadkii
d) In aqoonyahan kasta uu maqaal u diyaariyo Majallada Juula-Jawaay oo soo baxda 4jeer sanadkii.
e) Inaan ka qeybgalno tababarrada ay qabtaan Hey'addaa Caalamiga ah, anagoo u dirsaneyna tababar kasta aqoonyahan takhasusi ah, mana bedelno haddii isla shirkii uu soo noqnoqdo.
f) Waxaan baaris ku sameynay xeebaha Waqooyi iyo kuwa Koonfur ee Caasimadda, waxaanna ku soo ogaannay in Degaanka si xun burburin ugu socoto, waxaana ka qornay KITAAB.
g) Waxaan baaris ku sameynay Biyaha badda ee Caasimada, laga soo billaabo Kawaanka gowraca xoolaha ee Deg. Cabdicasiis iyo Dekedda weyn; waxaanna nooga soo baxay wasakheyn baaxad weyn; warbixin dheer ayaan ka diyaarinnay. Wasaarada dekedaha iyo gaadiidka badda siminaar ayaan ku qabannay, golaha wasiiraddana waan ka soo jeedinnay wasaqeyntaas.

Arrintaan aan soo xusney waxay na dhaxalsiisay in aqoonyahankeennu uu noqdo mid diyaarsan oo bixin kara TALO Cilmiyeeysan.

## III. TALOOYINKA AAN BIXINNAY:

1. Madaxtooyada: arrinta dacwada xudduud Badeedka Dalka WL.HCBS/01189/15 EE 10/102015.
2. Wasaaradda Dekeddaha & Gaadiidka Badda, Ujeeddo: wax ka qabashada burburinta xeebaha caasimadda iyo wasakheynta badda WL. HCBS/0111/03/15 EE 23/03/2015.
3. Wasaaradda Dekeddaha & Gaadiidka Badda Ujeeddo: wabixin ku saabsan guryaha taariikhiga ah ee wasaaradda dekedaha & g/badda WL. HCBS/0142/06/15 ee 11/6/2015
4. Wasaaradda Dekeddaha & Gaadiidka Badda, Ujeeddo: warbixin ku saabsan badda Muqdisho oo Khatari ku sii socoto, WL. HCBS/0153/15 ee 25/7/2015.

5. Wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda, Ujeeddo: Badbaadinta Qubada (oo caalami ahaan mamnuuc ah in la dabargooyo, Kawaanada Xamarna lagu gowraco laguna gado WL. HCBS/0110/03/15 ee 21/03/2015.
6. Gobolka Banaadir & Dowladda Hoose; Og: Wasaaradda Dekeddaha & Gaadiidka Badda, Ujeeddo: Dhibaatada ka jirta badda Caasimadda WL.HCBS/0169/09/15 ee 2/02/2015.

**IV. WAAJIBKA 3AAD WAA: Barridda iyo Tababarridda Kaaderka Hey'adda iyo Dadweynaha Soomaaliyeed.**

Qodobkaan wax weyn ayaa inooga qabsoomay oon qaar hore u soo xusnay sida:

a) Tababar gudaha ah
   1. Duruusta todobaadka  2jeer todobaadkii
   2. Tababarka Kaaderka  1jeer bishii
   3. Tababar guud oo  1jeer 3dii bilood oo mid ka mid ah lagu qabtay hoolka Was. Dek. & Gadiidka Badda.

b) SHIRARKII IYO TOBABARADII AY HAY'ADDU KA QAYB GASHAY 2015

**Qaanuunka Badda**

1. Xalane- Muqdisho, Qaanuunka Badda Caalamiga ah (UNCLOS), 12-16 July, 2015(5cisho).
2. Mombasa-Kenya, Maamulka Badaha Soomaliyeed (IMO), 3 bari-
3. Xalane-Muqdisho, Qaanuunka C. Badda ( 1 bari)
4. Beled xawo Xudduudda Somaliya iyo Kenya (2 Bari)
5. Jabuuti , Xuquuqda Haweenka ( 4bari)
6. Jabuuti , Xuquuqda Haweenka ( 3bari)
7. Sixitaanka qaanuunka C.badda intaan loo gudbin golaha Wasiirada
8. Eldoret - Coastal state, flag state and port state (19-23 oct.) (5 cisho)
9. Muqdisho , Xudduuddaha Federaalka (2 bari ).

Wadar = 9

Kheyraadka iyo Nabadgalyada badda

1. FAO, Xalane –Muqdisho: ka faa'iideysiga Badda ( 2 jeer)
2. FAO, Xalane –Muqdisho: Barnaamijka FAD ( fish aggregating device), 3 jeer
3. Madagascar , Maritime security ( 21-22 September) (1jeer)
4. Mauritius, Maritime security ( 3 jeer )

5. Seychelles, Maritime security (1 jeer )
6. Mampassa Maritime security (1 jeer ) 9-10/12/2015

Wadar = 11

**Deegaan Badeedka:**

1. Nairobi, Kenya, laqababsiga isbadalka cimilada (21 sept-11 Oct 2015).
2. FAO, Xalane –Muqdisho: Laqabsiga isbadalka cimilada ( 2bari )
3. FAO, Xafiiska Raysal Wasaaraha: Somali National Biodiversity strategy and action plan (2 bari)
4. Addis Ababa, Ethiopia: Africa Climate Change (19-21 Sept 2015).

Wadar = 4 jeer oo dhaadheer

**Maamulka:**

1. Muqdisho, Wasarada Maaliyadda: Somali Financial System ( 1 bari )
2. Muqdisho, Wasarada Maaliyadda: Sixitaanka Khaladaadka Nidaamka maaliyadeed ( 1 bari )
3. Muqdisho, Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha: Wacyigalinta Dhalinyarada Soomaliyeed (1 bari).

Wadar = 3

Wadarta Shirarkii iyo Tababaradii aan ka qeybgalney 2015= 27

**Gudaha:**

1. Tababar takhasus 3 dii bil mar ( 2 bari )
2. Tababar aan siinay Wasaarada Dekedaha iyo Gaadiidka Badda ( 1Bari)

c) Waxaan ka codsanay Hey'adda IMO inay laba aqoonyahan inoo siiyaan aqoonta MS, sidaas waxaan u dirnay labadii aqoonyahan Berbera si imtixaan looga qaado, waana ku guuleysteen, sanadkaan si rasmi ah ayey IMO u soo qortay labadoodii magac si loogu diro Jaamacada WMU ee Malmo- Sweden.

d) AKADEEMIYADA G/S BADMAAX KHALIIF MACOW XASAN oo loo qorsheeyey markii ay dhamaato marxalada xoojinta aqoontii D/SARE inay ka koobnaato laba Kulliyadood oo kala ah:

1. Kulliyadda Culuumta Badda & Deegaanka iyo
2. Kuliiyadda Qawaaniinta Badda

## V. Sare u Qaadidda Wacyigelinta Dadweynaha ee Arrimaha Badaha Soomaaliyeed.

1. Waxaan ka bixinnay ilaa 10 (toban) Cashir Radio Muqdisho iyo SNTV oo ku wada saabsan aqoonta badda iyo arrnita dacwadda ee Soomaaliya & Kenya oo aan si gaar ahaan u difaacnay, si cilmiyeysanna ugu raaridinay dadka Soomaaliyeed inaan gar u leenahay difaacidda (dacwada) biyaheenna, runtii su'aalo badan oo mugdi ku jiray ayaan bayaaninay si waafaqsan danaheenna & Qawaaniinteenna.
2. Sidoo kale nama soo maro hal todobaad oo aanan ka hadlin amaba aanan ka jawaabin arrimaha BADAHEENNA ee Raadiyaasha Xamar ku yaalla.
3. Waxaan soo saarnaa Majallada Juula-Jawaay oo saddex biloodle ah oon ugu talagalnay wacyigelinta badeed ee dadka Soomaaliyeed, (mid aqoonyahan ah iyo mid kaleba).

INTAANI WAXAY AHAAYEEN WIXII WAAWEYNAA OO HEY'ADDAAN U QABSOOMAY AYADOON ISHA KU HEYNAY WAAJIBAADKII HEY'ADDA LA SIIYEY.

Sidaas awgeed Hey'addu wali heerkii la rabay ma joogto.

**Waxayna u baahan tahay:-**

1. Guri ay degto oon KMG ahayn (xafiis)
2. Akadeemiyada oo la siiyo Dugsigii Badda oy isku ag yaalaan, haddii kale dowladdu ay bixiso ijaarka guriga ay deggan tahay. Annagu aqoonyahan badeed ahaan waxaan qabnaa inaan ANAGA KALIYA aan diyaarin karno Kaader badeed ee dalkaan laga haqabtiro.
3. Qalabka Cilmibaarista oo aad noogu yar
4. Aqoonta sare (MA, MS PHD) oo loo helo Cilmibaarayaasha hey'adda.
5. Hey'addu ilaa maanta oy wax badan u qabsoomeen waxay dowladdu uga bahan tahay Miisaaniyad Cilmibaariseed iyo gunooyin loogu tala galey Cilmibaarayaasha si loo geesinimogeliyo.

Intaan iyo in kale waa qorsheheenna 2016ka

Kitaabkani halkan ayuu inoogu idlaaday.

Annagoo ka codsaneyna ALLE inuu inoo fududeeyo howsha ina hortaal.
Waxaa inoo cadaatay in Cilmi baaris aan lagu guuleysan Karin taageero la'aan gaar ahaan xagga Dowladda.

DHAMAAD